


# HAGAHA FURITAANKA GOOBAHA GANACSIGA EE BIXIYA ADEEGGA CUNTADA

Hagaha bilaabida ganacsigaaga, iyo helitaanka ruqsaddaha, shatiyada iyo kormeerada



# TUSMO

<b>SHAXDA DULMARKA</b>	<b>1</b>
<b>HORDHAC</b>	<b>2</b>
<b>TALLAABADA 1: ISU DIYAARINTA</b>	<b>3</b>
<b>TALLAABADA 2: DOORASHADA GOOB</b>	<b>4</b>
<b>TALLAABADA 3: NAQSHADEYNTA MEESHA</b>	<b>5</b>
<b>TALLAABADA 4: OGGOLAANSHOOYINKA</b>	<b>6</b>
<b>TALLAABADA 5: BIXINTA ADEEGGA CUNTADA</b>	<b>7</b>
<b>LIISKA WAXYAALAHA KORMEERKA LAGU SAMEYNAAYO</b>	<b>8</b>
<b>LIISKA MACLUUMAADKA LA XIRIIRIDA WAAXAHA</b>	<b>11</b>

# START BUSINESS

	Getting Ready	Choosing a Location	Designing the Space	Approvals	Serving Food
Restaurant Owner	Develop Business Plan	Architectural Plans		Construction Food Manager & Allergen Certification	
Economic Development	Advice & Guidance				
Inspectional Services Department (Building)		Building Permit	Building Work Permits		
Inspectional Services Department (Health)		Certificate of Occupancy	Architectural Plan Review		Health Inspection
Fire Prevention Department			Apply for Food Service Permit		Food Service Permit
Licensing Board (City Hall)			Construction Permit	Place of Assembly Permit	
Other Approvals		Zoning Review		Common Victualer License	Additional Licenses (as needed)

## **HORDHAC**

Waad ku mahadsantahay tixgelinta in aad ganacsigaag cuntada aad magaalada Boston ka furto. Furitaanka ganacsi cunno waa shaqo adag. Kooxdeena waxay diyaar u yihiin in ay ku caawiyaan!

Hagahaan wuxuu kuu dulmarayaa, kuuna qeexayaa habka ruqsadeynta iyo kormeerka u gaarka ah makhaayadda ee Magaalada Boston. Wixii su'aalo ah, fadlan la xiriir Waaxda Adeegyada Kormeerka ee Boston (ISD) Qeybta Caafimaadka, iyo Waaxda Hormarinta Dhaqaalaha, ama wac 311.

## **STEP 1: IS DIYAARINTA**

### **FAHAN HABKA OO SAMEYSO QORSHE**

Tag bogga 11aad si aad u hesho liiska link-yada website oo dhameystiran.

- Xafiiska Duqa Magaalada ee Hormarka Dhaqaalaha waxa uu bixiyaa waxyaalaha loo baahan yahay oo dhameystiran oo loogu talagalay dhammaan ganacsiyadda magaalada Boston, oo ay ku jiraan Kooxda Horumarinta Ganacsiyadda Yaryar iyo tan Waddooyinka waaweyn ee Boston, kuwaas oo labaduba ay bixiyaan waxyaalo ka caawinaya bilaabida, kobcinta, iyo dhisida ganacsiyada ee Boston.
- Ku bilaaw inaad la xiriirto Maamulahaaga Ganacsi Xaafadeedka (NBM). NBM-yada waa khabiir ku takhasusay ganacsiga yaryar waxayna kaa caawin karaan sida makhaayad looga furo Boston. La xiriir khabiir si aad wax badan uga ogaato ruqsadeynta iyo shatiyeeynta, samaynta qorshe ganacsi, doorashada goob, ama arrimaha kale ee muhiimka ah ee ganacsiga la xiriira.
- Xarunta Hormarinta Dhaqaalaha waxay bixisaa aqoon-is-weydaarsiyo lagu kordhinayo helitaaka waxyaalaha ay u baahanyihiin iyo fursado, oo ay ku jiraan taxane aqoon-is-weydaarsi oo loogu talagalay ganacsiyada cuntada.

## TALLAABADA 2: DOORASHADA GOOB

### SEEREYNTA IYO DEGANAANSHAHA

Tag bogga 11aad si aad u hesho liiska link-yada website oo dhameystiran.

- Khadka ka fiiri seereynta adiga oo raadinaya in goobta ay tahay goob ganacsiyeed ee khariidadda la raadin karo ee Maamulka Dib-u-hormarinta Boston.
- Hubi in goobtaa laga ogol yahay, mamnuuc tahay, am ay shuruudo xeerka seereynta ay ku xiran yihiin in Maqaayad, Ku Adeegista Qaab Safaari ah, Cuntada Lagu Iibsado Qaab Wado Maris ah, ama u isticmaalka Munaasabadaha Madadaalada Tooska ah adiga oo u maraya xeerka Xaafadaha ee Qodobbada 38-73.
- Hubi isticmaal sharciyeed ee dhismaha oo jira iyo deggenaanshiyaha si online ah adiga oo u maraya website-ka BuildingPermit Search (Raadinta Ruqsadda Dhismaha).
- Si aad u bedesho seereynta ama isticmaalka, xarayso Foom Dheer qaab onlayn ah oo rafcaan u dir Gudiga Racfaanka aagga haddii ay tahay mid shuruudo ku xiran ama isticmaalka goobtaas ay mamnuuc tahay.
- Soo gudbi codsiga ruqsadda dhismaha ee dhisid walba oo lagama maarmaan ah. Soo gudbi foom dheer qaab onlayn ah si aad u sameyso isbadalo dhismeed ama qaabdhismeed waaweyn. Soo gudbi Foom Gaaban si aad u sameyso isbadalo yaryar. Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan noocyada ruqsaddaha dhismaha, booqo **bit.ly/permit-ISD**
- Hel Shahaadada Deganaanshaha adiga oo soo gudbinaya Arjigaaga Shahaadada Deganaanshaha. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan la xiriir **ISDcertificates@boston.gov** (tixraac shuruudaha ISD ee Shahaadada Deganaanshaha,).
- Marka aad warqada heshiiska kirada hesho, la xiriir Maamule Xaafadeedkaaga Ganacsi si aad ugala hadasho caawinta hagaajinta boorarka ama afaafka hore ee goobtaada ganacsi!

## TALLAABADA 3: NAQSHADEYNTA GOOBTA OGGOLAANSHAHA DHISMAHA IYO DHISIDA

Tag bogga 11aad si aad u hesho liiska link-yada website oo dhameystiran.

Dib u eegis ha laguugu sameeyo qorshayaashaada; hel oggolaanshaha Waaxda Adeegyada Kormeerka (ISD) ee Qeybta Caafimaadka ee naqshadeynta makhaayadda ka hor inta aan la dhisin ama wax laga beddelin. Codso ruqsadda caafimaadka wakhtigaas, bixi kharashka ruqsadda oo soo gudbi 4 qaybood oo qorshooyinka goobta ah, tilmaamaha qalabka ee soo saaraha qalabka ee qalabka cusub ee lagu rakibay ee buuxinaya shuruudaha shahaadooyinka NSF/UL, Dib u Eegista Cunnada Ganacsiga, menu ay macaamiisha ka tala baxsadeen (haddii ay haboon tahay). Codso ballan dib u eegis qorshe ah adigoo iimayl u diraya **ISDHealth@boston.gov** ama wac **617-635-5326**

- Waaxda Kahortagga Dabka ee Boston (BFD) waxay sidoo kale u baahan tahay ruqsaddaha mashaariicda dhismaha.
- Hel ruqsaddaha dhismaha/tubooyinka/gaaska/korontada/farsamada habboon adoo u maraya nidaamka codsashada am aarjiga onlaynka ah ee ISD. Kaliya qandaraaslayaasha shatiga haysta ayaa codsan kara. Hel dhammaan baaritaannada loo baahan yahay.
- Ruqsadda Isu-imaanshaha Goobta (haddii ay isugu imaan karaan 50 qof ama ka badan) waxaa bixisa Waaxda Kahortagga Dabka ee Boston (BFD). Fadlan hubi Xeerarka iyo Shuruudaha khuseeya.
- Shahaadada Kormeerka: Soo gudbi 3 qorsheyaal oo ku shaabadaysan oggolaanshiyo ka socda ISD iyo BFD oo ku socda miiska ama qeybta 3A ee ISD; kadibna sug kormeer. Soo deji liiska hubinta iyo/ama arjiga

## **TALLAABADA 4: OGGOLAANSHOOYINKA**

### **SOO URUURI DHAMAAN SHATIYADA IYO RUQSADAHA LAGAMA MAARMAANKA AH**

Tag bogga 11aad si aad u hesho liiska link-yada website oo dhameystiran.

- Ka hel shatiga Common Virtuller (Bixinta Adeega Cuntada Diiwaangashan) Guddiga Shatiyeenta.
- Waxaad u baahan tahay in shirkad madax-bannaan ay kaa xaqijiso in aad tahay maareeye cunto.
- Hel shahaadada wacyigelinta xasaasiyadda.
- Iyada oo ay ku xiran tahay nooca ganacsigaaga, waxa laga yaabaa inaad sidoo kale aad u baahato mid ama ka badan oggolaanshooyinkaan soo socda:
  - Shatiga Madadaalada Tooska ah ama Shatiga Madadaalada aan Tooska Ahayn.
  - Shatiga Miiska Buulka
  - Ruqsadda Kafeega Marshibiyeedka Lagu Gado
  - Ogolaanshaha Adeegyada Baarkinka
  - Shatiga Likerka (nool ka mid ah khamriga)
  - Codso Shatiga Nadaafadda Goobta.
  - Codso Ruqsadda Meelaynta Qashin-qubka: Haddii uu ka weyn yahay 3 yaardi afarta dhinac, buuxi Foomka Arjiga Ruqsadda Sannadlaha ah.
  - Shahaadada Ganacsiga ee Xafiiska Karaaniga ee Magaalada Boston
  - Tuubooyinka iyo Qalbka Qiica Aruuriya ee jikada waxay u baahan yihiin in dib-u-eegis ay ku sameeyso Waaxda Dhismaha iyo in ay Shahaado ka hesho Waaxda Dabka ee Boston.



## TALLAABADA 5: BIXINTA ADEEGGA CUNTADA RUQSADDA ADEEGA BIXINTA CUNTADA IYO KORMEERKA

Tag bogga 1aad si aad u hesho liiska link-yada website oo dhameystiran.

Si loo dhamaystiro nidaamka looguna diyaargarooobo Kormeerka Caafimaadka, fadlan soo gudbi dhammaan shahaadooyinka, shatiyada iyo/ama ruqsaddaha haray oo lagama maarmaanka ah. Waxayna kala yihiin sidaan:

- Shahaadada Deganaanshaha ama Shahaadada Kormeerka
- Arjigaaga ruqsadda bixinta adeegga cuntada oo dhammaystiran
- Nuqulka Shahaadadaada Maareeyaha Cuntada iyo Shahaadadaada Wacyigelinta Xasaasiyadda
- Shatigaaga Common Victualler (Bixinta Adeegga Cuntada Diiwaangashan)

**Fadlan ogow:** Haddii aadan bixin khidmadaha markii qorshahaaga dib u eegis lagu sameeyay, waa inaad keentaa lacagta markaad booqato xafiiska ISD. Sidoo kale waan in aad keentaa nuqulada caymiska magdhawga shaqaalaha iyo lambarkaaga aqoonsiga cashuurta ee dawladda dhexe (Federal Tax ID No.) ama lambarka Ilaalinta Bulshada (SSN).

Haddii dhammaan waraaqahaaga ay hagaagsan yihiin, ISD waxay dejin doontaa codsi kormeer hawleed hore. Waaxda caafimaadka ayaa kaa caawin doontaa inaad dejiso kormeerka hawlgalka hore waxayna xaqiijin doontaa ballantaada. Waqtiga kormeerka, Kormeeraha Caafimaadka wuxuu hubin doonaa inaad u hoggaansantay koodka, wuxuuna ka jawaabi doono su'aalo kasta oo aad qabtid.

### **Waaxda Kormeerka Caafimaadka**

1010 Massachusetts Ave. Boston, MA 02118

Saacadaha shaqada xafiiska: Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo - 4:00 galabnimo

Haddii aad ku bixinayso lacag caddaan ah ama kaarka deynta, waxaad u baahan tahay inaad bixiso 3:30 galabnimo.

## LIISKA WAXYAALAHA KORMEERKA LAGU SAMEYNAAYO

Dhamaystirka liisgaan hubinta ah ma dammaanad qaadayso ogolaansho kormeer. Macluumaadkaan lagu siinayo wuxuu kaa caawinayaa in aad u diyaargarowdo kormeerka/kormeerada lagama maarmaanka u ah bilawga makhaayadaada. Wixii su'aalo ah, fadlan xiriir Waaxda Caafimaadka I [SDHealth@boston.gov](mailto:SDHealth@boston.gov) , ama wac **311** .

### **KORMEERKA DHISMAHA - SHAHAADADA DEGANAANSHAHA**

- Nalalka degdega ah (emergency lights) ayaa
- rakiban oo waa ay shaqaynayaan
- Meelaha lagu baxsado markii ay arimo degdeg ah yimaadaan sida dabka ayaa ah kuwa shaqeynaya oo la aqbali karo  
Kaarka xogta qalabka dab-demiska ayaa ah kuwo sax wakhti xaadirkaan
- Shaqada nadiifinta tubooyinka qaada hawada
- wasaqda ah/tan mukeefka ee goobta ganacsi ayaa ah mid la qabto wakhtiyada oo jadwaleeyay.  
Jaranjarooyinka si sax ah ayaa loo taagay
- Boorarka ay ku qoranyihiin meelaha laga
- baxo/jihooyinka ayaa ah kuwo la arki karo oo shidan  
Tubada rusheeynta ayaa si sax ah u shaqeyneysa
- Qalabka alaarmiga dabka/qalabka
- qiiqa  
Wadooyinka laga baxo ayaan xannibnayn
- Shuruudaha guud waa la buuxiyey oo waa lagu qanacsan yahay

## **KORMEERKA DABKA - QUQSADDA ISU-IMAANSHAHA GOOBTA**

- Waa la dhejiyay Shahaadada
- Kormeerka ISD
  - Waa la dhejiyay Ruqsadda Isu-imaanshaha Goobta
- Heysashada ruqsadaha in dhammaan agabka qurxinta, alaabta guriga, iyo kuwa banaanka goobta ay yihiin kuwo aan dabka qabsaneynin ama iska caabin karo
- Qariirada meelaha laga baxo markii ay arimo degdeg yimaadaan ayaa ah kuwo diyaarsan, oo waafaqsan qaabka alaabta goobta
- Meelaha lagu baxsado markii ay arimo degdeg ah yimaadaan sida dabka ayaa ah kuwo muuqda oo shaqaynaya
- Albaabada is-xira ayaa si sax ah u shaqeeynaya
- Albaabada laga baxa ayaa ah kuwo u furma banaanka
- Meelaha laga baxo ayaan xannibnayn, kuwaas dad ku ridaya waddada dadweynaha
- Guud ahaan nadaafada goobta oo wanaagsan
- Jaranjarooyinka ayaa ah kuwo muuqda oo leh boor saxan
- Kormeerada qalabka alaarmiga ayaa ah kuwo shaqeeynaya oo aan waxba ka haleysnayn
- Kormeerada tubada rusheeynta ayaa ah mid shaqeyneysa oo aan waxba ka haleysnayn

## **KORMEERKA CAAFIMAADKA - RUQSADDA CAAFIMAADKA EE BIXINTA ADEEGGA CUNTADA**

Goobaha ganacsiga waa inay xaqiijiyaan u hoggaansanaanta Xeerarka Cunnada iyo Xeerka Cunnada Federaalka ee 2013 iyo kan lagu daray 2015, ayna helil karaan xeerarka xarunta.

- Qofka Mas'uulka ah (PIC), waa mid aqoon leh, oo la socdaa khataraha badbaadada cuntada wuxuuna sameeya go'aano sax ah. Qofka Mas'uulka ah (PIC) ayaa la heli karaa dhammaan saacadaha shaqada
- Shaqaalaha ayaa loo tababaray waajibaadkooda iyo masuuliyadooda
- Sharciga faraya shaqaalaha in ay soo gudbiyaan xanuunsanaantooda hab la xaqiijin karo
- Helitaanka meelaha gacmaha lagu dhaqo oo gooni ah oo loo keenay diyaarinta cuntada, qaybinta iyo meelaha alaabta lagu dhaqo; marka lagu daro musqulaha
- Meelaha cuntada ay soo maro sida miisaska ayaa si sax ah ayaa loo naqshadeeyay, loo dayactiray, loona rakibay
- Heysashada Alaabta karinta iyo diyaarinta cuntada NSF ee karinta, keydinta cuntada oo kuleel ah, qabow ah iyo yareynta kuleelka cuntada in aan qaboojiye ama firinjeer la galinin
- Meelaha aan cuntada soo marin sida dhulka am albaabada ayaa si sax ah ayaa loo naqshadeeyay, loo dayactiray, loona rakibay
- Kaydinta saxda ah ee dheriyada iyo digsiyada nadiifka ah iyo kuwa wasakhaysan
- Mashiinka alaab nadiifinta heerkulkiisu sarreeyo ama meesha alaabta lagu dhaqdo oo ka kooban 3 qeybood ku filan oo leh qeyb alaabta lagu qalajiyo - qalabka tijaabada

## **TUUBOYINKA GALINTA BIYAHA IYO QASHIN QUBKA**

- Nidaamyada Tuubooyinka biyaha la cabbi karo (cabitaanka) iyo kuwa wasakhda ah ayaa si sax ah loo tubo galiyay. Ma jiraan biyo wasakh ah oo dib usoo noqonaya; Qalabka dib-u-socodka ku haboon ayaa la rakibay
- Tiro kugu filan oo weelasha qashinka iyo meel wax lagu keydiyo oo daboolan, nadiifna ah.

- In ay jirto meesha wasaqda lagu dhaqo oo cuntada lagu diyaariyo si qudaarta iyo miraha loogu dhaqo
- Waxaad heysataa meesha lagu dhaqo tirtiraha

## **QEYBAHA GOOBATA**

- Habeysan nadiifna ah
- Sanduuqyada shaqaalaha ee lagu kaydiyo dharka iyo alaabta shakhsi ahaaneed ay u leeyihiin shaqaalaha
- Maqaasiin ku filan alaabta qalalan, alaabta adeega, alaabta dayactirka, iyo kiimikooyinka
- Qalabka iftiinka ee ka sarreeya alaabta cuntada ayaa leh gaashaanka ilaalinta si saxan loo rakibay
- Laguma arkaayo waxyaalo cadeynaya in jiidka ama cayayaan goobtaas laga helayo
- Agagaarka maqaasiinka ee bannaanka waa nadiif
- Agagaarka jikada ayaa hawo wanaagsan leh kormeerida qalabka dhuuqa qiica ee jikada korkeedana waa la sameeyay
- Ka eeg liiska oo dhan ee ku xad-gudubyadda xeerka caafimaadka website-ka Maxakamadda Cuntada ee Duqa magaalada (Mayor's Food Court).

# LIISKA MACLUUMAADKA LA XIRIIRIDA WAAXAHA

## WAAXDA ADEEGYADA KORMEERKA

### **Qaybta Caafimaadka**

[boston.gov/departments/inspectional-services/health-division](http://boston.gov/departments/inspectional-services/health-division)

### **Sida loo helo ruqsadda adeegga cuntada**

[boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-foodservice-permit](http://boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-foodservice-permit)

### **Xeerarka cuntada**

[mass.gov/lists/retail-food](http://mass.gov/lists/retail-food)

### **Xeerka Cuntada Federaalka 2013**

[fda.gov/food/fda-food-code/food-code-2013](http://fda.gov/food/fda-food-code/food-code-2013)

### **website-ka Maxakamadda Cuntada ee Duqa magaalada (Mayor's Food Court).**

[boston.gov/health-and-human-services/mayors-food-court](http://boston.gov/health-and-human-services/mayors-food-court)

Xeerka Seereynta -

[library.municode.com/ma/boston/codes/development\\_authority](http://library.municode.com/ma/boston/codes/development_authority)

### **Ruqsadda Raadinta**

[boston.gov/departments/inspectional-services/how-find-historical-permit-rikod](http://boston.gov/departments/inspectional-services/how-find-historical-permit-rikod)

### **Sida loo codsado ruqsadda foomka dheer**

[boston.gov/departments/inspectionalservices/how-get-long-form-permit](http://boston.gov/departments/inspectionalservices/how-get-long-form-permit)

### **Sida loo codsado foomka gaaban**

[boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-short-form-permit](http://boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-short-form-permit)

### **Sidee rafcaan loogu dirsadaa Guddiga Seereynta (Zoning Board)**

[boston.gov/departments/inspectional-services/how-file-appeal-zoning-board](http://boston.gov/departments/inspectional-services/how-file-appeal-zoning-board)

**Noocyada ruqsaddaha dhismaha,**

[boston.gov/departments/inspectional-services/what-building-permit-do-i-need](https://boston.gov/departments/inspectional-services/what-building-permit-do-i-need)

**Shahaadada Deganaanshaha**

[boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-record-legal-occupancy](https://boston.gov/departments/inspectional-services/how-get-record-legal-occupancy)

**HORMARKA DHAQAALAHA**

**Waaxda Dhaqaalaha**

[boston.gov/departments/economic-opportunity-and-inclusion](https://boston.gov/departments/economic-opportunity-and-inclusion)

**Horumarinta Ganacsiyada Yaryar**

[boston.gov/departments/small-business-development](https://boston.gov/departments/small-business-development)

**La xiriir khabiir**

[boston.gov/departments/economic-development/connect-your-area-business-manager](https://boston.gov/departments/economic-development/connect-your-area-business-manager)

**Xarunta Horumarinta Dhaqaalaha**

[boston.gov/departments/small-business-development/economic-development-center](https://boston.gov/departments/small-business-development/economic-development-center)

**Horumarinta Ganacsiyada Yaryar**

[boston.gov/departments/small-business-development](https://boston.gov/departments/small-business-development)

**Barnaajimka Boston Main Streets (Wadooyinka Waaweyn ee Boston)**

[boston.gov/departments/economic-development/boston-main-streets](https://boston.gov/departments/economic-development/boston-main-streets)

**Horumarinta boorka ama muuqaalka afaafka hore ee goobta**

[boston.gov/departments/small-business-development/storefront-improvements](https://boston.gov/departments/small-business-development/storefront-improvements)



## **GUDDIGA SHATIYEENTA**

**Sida loo helo Shatiga Common Victualler (Bixinta Adeegga Cuntada Diiwaangashan)** [boston.gov/departments/licensing-board/how-get-common-victualler-license](https://boston.gov/departments/licensing-board/how-get-common-victualler-license)

**Sida loo helo shatiga madadaalada tooska ah**  
[boston.gov/departments/consumer-affairs-andlicensing/how-get-annual-live-entertainment-license](https://boston.gov/departments/consumer-affairs-andlicensing/how-get-annual-live-entertainment-license)

**Sida loo helo shatiga miiska buulka (pool table)**  
[boston.gov/departments/licensing-board/common-licensing-board-foomamka-iyo-applications](https://boston.gov/departments/licensing-board/common-licensing-board-foomamka-iyo-applications)

**Guddiga Shatiyeenta Boston**  
[boston.gov/departments/licensing-board](https://boston.gov/departments/licensing-board)

**khariidadda la raadin karo ee Maamulka Dib-u-habaynta Boston**  
[maps.bostonredevelopmentauthority.org/zoningviewer/](https://maps.bostonredevelopmentauthority.org/zoningviewer/)

## **WAAXDA DABKA BOSTON**

**Codsiyada iyo tilmaamaha Waaxda Ka-hortagga Dabka Boston (BFD)** [boston.gov/departments/fireprevention/fire-forms-permits-applications-and-fees](https://boston.gov/departments/fireprevention/fire-forms-permits-applications-and-fees)

**Tilmaamaha iyo shuruudaha ruqsadda isu-imaatinka meelaha**  
[onlinepermitsandlicenses.cityofboston.gov/BFD](https://onlinepermitsandlicenses.cityofboston.gov/BFD)

